

Talooyinka Golaha Latinta La Dagaallanka Midabtakoorka ee Alberta

Juun 11, 2021

Golaha Latalinta La Dagaallanka Midabtakoorka ee Alberta (The Alberta Anti-Racism Advisory Council) ayaa soo saaray talooyinkooda ku aadan sida wax looga qaban karo midabtakoorka ka jirta gobolka.

Talooyinka loo soo gudbiyay Dowladda Alberta waxay ku saleysnaayeen cilmi baaris ay sameeyeen guddi hoosaadyo afar arrimood mudnaan leh: dowlad ka tarjumeysa Alberta; ka hortagga iyo ka jawaabista dambiyada nacaybka iyo dhacdooyinka nacaybka; barida ixtiraamka midba midka kale; iyo qiimeynta xirfadaha iyo khibradaha goobta shaqada.

Dowlada Alberta waxay biloowday howlo dhowr ah oo kahortaga midabtakoorka, oo ay kamid yihiin: sameynta xiriiriyaha arrimaha danbiyada nacaybka iyo Waaxda Isuduwaha Dembiyada Nacaybka; si rasmi ah u aqoonsada Boliiska Dadkii Hore ee sida uu dhigayo *Sharciga Booliska (The Police Act)*; joojinta ku dhaqanka adeesiga awooda; ayna soo bandhigayaan Barnaamijka Kaabayaasha Amniga ee Alberta (Alberta Security Infrastructure Program); dejinta Ku Dhaqanka Sharciga Diiwaangelin ku saleysan Caddaalada (the *Fair Registrations Practices Act* iyo abuurista Xafiiska Cadaalada loogu talagalay Dadka soo Galootiga ah, oo ka caawiya dadka reer Alberta in aqoontooda la aqoonsado; iyo sameynta siyaasad isgaarsiineed oo loo dhan yahay oo loogu talagalay dowladda. Talooyinkani waxay gacan ka geysan doonaan hagida shaqada dowladda ee ku aaddan dadaallada ka dhanka ah midabtakoorka ee horay u socda.

Xogta la xiriirta

- Talooyinka Golaha La-dagaallanka Midabtakoorka ee Alberta ([Alberta Anti-Racism Advisory Council recommendations](#)) (PDF)

Ka ilaalinta dadka reer Alberta ee nugul dambiyada nacaybka

Juun 11, 2021

Barnaamijka Kaabayaasha Amaanka Cusub ee Alberta (The new Alberta Security Infrastructure Program) wuxuu gacan ka geysan doonaa ilaalinta bartilmaameedyada dambiyada ku saleysan naceybka iyadoo lagu maalgelinayo casriyeynta amniga.

Bilowga dayrtaan, ururada diinta, kuwa qowmiyadaha iyo kooxaha Asaliga ah ee halista ugu jira in lagu bartilmaameedsado rabshadaha nacaybka kiciya ama kharbudaada ayaa awoodi doona inay codsadaan deeqo loogu talagalay amniga iyo hagaajinta tiknoolajiyada.

Maalgelinta loogu talagalay casriyaynta kaabayaasha xarunta, oo ay ku jiraan amniga iyo nidaamyada kormeerka, ayaa gacan ka geysan doonta ka ilaalinta burburka iyo falal dambiyeedyo kale ee labada kala ah dadka iyo hantidaba. Barnaamijka wuxuu noqon doonaa mid fudud oo la heli karo oo ku filan si looga hadlo tallaabooyin badan oo ilaalin ah, sida qorsheynta amniga, waxbarashada iyo tababarka.

Codsiga ugu horeeya ee deeqaha ayaa dhici doona deyrtaan. Wadar dhan \$ 500,000 ayaa la heli doonaa, iyadoo codsabayaasha ay xaq u leeyihiin ilaa \$ 10,000 si ay uga caawiyaan tababarka iyo qiimeynta amniga, iyo sidoo kale ilaa \$ 90,000 kaabayaasha amniga. Xog dheeraad ah oo ku saabsan u qalmitaanka barnaamijka iyo habka dalabka ayaa la heli doonaa bilaha soo socda.

U istaagida dembiyada nacaybka

Juun 10, 2021

Dowlada Alberta waxay bartilmaameed saneysaa dambiyada ku saleysan naceybka iyo midabtakoorka ilaha cusub ee fulinta sharciga iyo hanaan cusub oo ay kula shaqeyneyso bulshooyinka ay saameysay si loo hubiyo in dadka reer Alberta kasoo jeeda jinsiyadaha la midabtakooro la ilaaliyo lana maqlo.

Xiriiriyaha cusub ee bulshada ee dambiyada nacaybka ayaa si toos ah ugu xirmi doona kooxaha qowmiyadaha iyo diinta iyo beelaha laga tirada badan yahay ee galmada ee inta badan lala bartilmaameedsada dambiyada nacaybka ku saleysan. La shaqeynta kooxahan, xiriiriyaha wuxuu dowlada siin doonaa aragtiyo iyo khibrado kaladuwan oo ku saabsan sida aan ula tacaali karno dambiyada iyo dhacdooyinka naceybka ku saleysan ee ka dhaca guud ahaan gobolka.

Alberta sidoo kale waxay dhisi doontaa Qeybta Isuduwidda Dembiyada Nacaybka Gobolka (Hate Crimes Coordination Unit). Qeybtan waxay la shaqeyn doontaa sharci fulinta si loo wanaajiyo loona waafajiyo dadaallada yareynta dambiyada nacaybka ee ka dhaca guud ahaan gobolka loona fududeeyo fursadaha tababarka, ururinta sirdoonka iyo taageerrada baaritaanka. Tan waxaa ka mid ah xoojinta habka si guul leh loogu maxkamadeeyo dadka lagu soo oogay dambiyada ku saleysan naceybka.

Labadaba xiriiriyaha xiriirka iyo isuduwidda labadaba waxay kujiraan heerarka hore ee horumarka. Faahfaahin dheeraad ah ayaa lala wadaagi doonaa toddobaadyada soo socda.

Si aad u hesho ilo badan oo dowladda loo turjumay, fadlan booqo: <https://www.alberta.ca/covid-19-translated-resources.aspx>.